

QODOBKA 1AAD.

Wasiir	Waa Wasiirka Cadaaladda
Taliye	Waa Taliyaha Ciidanka Asluubta
Xabsi Dhexe	Waa Xabsiga Dhexe ee Mandheera
Maxbuus	Waa Maxbuus Maxkamad ama Hay'ad sharci ahi Soo Xidhay
Xabsi Caadi ah	Waa Xabsiyadda Gobolada & Degmooyinka
Xabsi Ku Meelgaadh ah	Waa Xabsi Furan oo ku meelgaadha ah oo loo istic- Maalo (Open Prison) Mid wax soo Saar
Maxbuus Caruur ah.	Waa Maxbuus Caruur ah oo Xabsiyadda lagu soo Xidho Da'diisuna 18 Jir & wax ka hooseeya ay Tahay oo Qal-qaalinimo loo soo Xidhay, ama Dembi culusba
Maxbuus Xabsi badane ah	Waa maxbuus Xabsi badane ah oo Xabsiyada lagu Soo xidho (Long Term Prisoner)
Maxbuus Xabsi yare ah	Waa Maxbuus Xabsi yare ah oo Xabsiyadda lagu Xidho (Short Term Prisoner) Sanad & wax ka Hooseeya waa wixii aanu Sharci Maanacaha Xabsiyadu aanu ogolayn in Xabsiga la soo geliyo
Mamnuuc	Waa Qodob madnuuc ka ah Xabsiyada ama in Walax Gudaha & Dibada laga xaaraatimeeyay Soo gelinta & Bixinteedaba
Ciidanka	Waa Ciidanka Asluubta J . S . Land
Siidayn	Waa maxbuus Xabsiga laga sii daayay
Gelid	Waa Maxbuus Xabsiga soo Galay

QODOBKA 2AAD.

- 1- Taliyaha Ciidanka Asluubtu wuxuu soo Magacaabi karaa Xabsi ku meelgaadh ahaan loo furay si wax soosaarka loo badiyo kedib markuu la tashado Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda.
- 2- Waa in la soo Xidho hadii Nabad-gelayadda meeshu xumaato waxa loo doonayaa Amarka Taliyaha Guud marka uu gaadho Taliyaha Xabsigaasi waa in uu Maxaabiista uga raraa Goob kale oo loo Cayimay.

- X- Anshaxa Wanaagsan ee Ciidanka Asluubtu waa Hormoodka toosinta Maxbuuska waana bar tilmaameedka Asluubta & nololsha dambe ee Maxbuuska.

QODOBKA 3AAD.
HABKA MAGACAABDIDA XABSIYADDA.

Marka loo baahdo in meel lagu Magacaabo Xabsi ama Xarun Asluubeed Taliyaha Ciidanka Asluubta ayaa soo Jeedin Talo ku siinaya Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda kaas oo ka soo saari doona Xeer Digreeto (**Degree**) uu ku Magcaabaayo Xabsiga ama Xarunta.

QAYBTA LABAAD.
KALA SAARIDA XABSIYADA & MAXAABIISTA

QODOBKA 4AAD.
HAYNTA MAXAABIISTA XUKUMAN.

Isaga oo Taliyuhu Nabad-gelyadda awgeed Amar ka bixinaaya mooyaane Maxaabiista Xukuman oo ay ku jiraan La'hayayaasha lagu soo Xidho Xeerka Garka ah Hayntoodana ay soo Xalaaleeyaan Hay'addaha awooda u lahaa Mudooyinka Xukunkooda waxa ay ku dhamaanayaan .

- B- Xabsiga Degmadda lagu Xukumay, hadii mudadda Xabsigiisu ka hadhay aanay Ka badnayn Hal Sano markii Xukunkiisii u dambeeyay lagu Dhawaaqay.
- T- Xabsiga Gobolka hadii mudadda Xadhigiisa ka hadhay aanay ka badnayn Laba Sano markii Xukunka ugu dambeeyay lagu Dhawaaqay.
- J- Xabsiyadda Dhexe ama kuwa gaarka ah Maxaabiista **Dil Sugeyaaasha ah**, ama Kuwa Xadhigoodu ka badan yahay Laba Sano Marka Xukunka ugu Dambeeyay Lagu dhawaaqay & kuwa soo Noqdayaasha ah & Dembi Caadaystayaasha Xadhigoodu ka badan yahay Hal Sano.
- X- Xuruufaha B.T. J ee Qodobkan waxa ka reeban Maxaabiista Caruurta ah, Haweenka, & Maxaabiista laga soo Xidho Ciidamadda Qalabka Sida kuwaasi Oo ay Hayntoodu Hoos ku Xusan tahay:-
- 1- Maxaabiista Caruurta ah waa in lagu hayaa Meel Gaara ah, Maxaabiista waa wayn in ta loo bedelaayo Xabsiga Caruurta ah sida uu dhigaayo xeerka Lr.94/96 soona baxay Bishii March 1996 kii ama meesha kale ee loo qoondeeyay.
 - 2- Iyada oo la Tixgelinaayo Caafimaadka & Xanaanada u gaarka ah Haweenka qofkii Xadhigiisu ka badan yahay 6 bilood waxa lagu haynayaa oo kaliya Xabsiga Gobolka ama Xabsiga Dhexe ee Qaybta Haweenka .
 - 3- Maxaabiista laga soo Xidho Ciidamadda Qalabka sida waxa lagu haynayaa Xabsiyadda Dhexe & kuwa Gaarka ah Qayb ka Gooni ah Maxaabiista kale meeshii Suurtaga ah inta loo bedelaayo Xabsi loo Qoondeeyay

- 4- Sida uu dhigaay Qodobka 15aad Xarfaha 5aad ee Xeerka Nabsiyadda markii ay dhacdo in Haweenka sida Caruurta Maskamadi u Aqoonsatay in ay Canugaasi ku haysato xabsiga Gudihiiisa, ama Haweenay Uur lahayd ay ku Dhasho Ilmo Xabsiga Gudihiiisa, Ilmahaasi waxa uu hooyadii kul Noolaanayaa xabsiga Gudihiiisa mudo aan ka badnayn Laba Sano, Mudadda Labada Sano ka hor waa in uu Taliyaha Xabsigu u Tabaabusheeyaa sidii Ilmahaasi loogu Wareejin lahaa Eheladiisa, Hase yeeshee hadii ay Sugnaato In aanu Ilmahaasi Lahayn Ehelu waxa lagu wareejinayaa Xarunta Lagu Xanaaneeyo Caruurta Agoonta ah.

QODOBKA 5AAD
HAYNTA MAXAABIISTA AAN XUKUNAYN.

Isagoo Taliyuhu Daryeelka Nabad-gelyadda awgeed Talo ka dhiibta mooyee Maxaabiista aan Xukunay, ama La'hayayaasha amarkii hayntooda ay ku bixiyeen Hay'adihii Sharci ahaan Awooda u lahaa Xeerarka gaarka ah (Special Laws) walise sugaayo Xalaalayntii hayntooda waxa lagu haynyaa xabsiyada Hoos ku qoran:-

La'hayayaasha waxa lagu haynayaa Xabsiyada ku Qoran Jideeyaha Xadhiga, Hase yeeshee Daryeelka Nabad-gelyadda awgeed, ama Cidhiidhi darti waxa lagu bedeli karaa Amarka Taliyaha, Xabsi kale oo Munaasib u ah markaas oo kale waa in la ogaysiiyaa Hay'adihii soo Xidhay.

QAYBTA 3AAD,
QABASHADDA MAXAABIISTA & GUDIGA SOO DHAWAYNTA
(Reception Board).

QODOBKA 6AAD
QABASHADDA MAXAABIISTA.

Taliyaha Xabsigu waa in uu ku dhqmaa Habkan soo socda ee la xidhiidha Qabashadda maxaabiista:-

- 1- Kedib marka Jideeyaha Xadhiga ama amarka Xadhiga la Hubiyo sida uu dhigaayo Xarfaha Labaad & kan sadexaad ee Qodobka 5aad ee Xeerka Qolka ku qoran ee Jideeyaha, ama amarka Xadhiga waxaa la gaynayaa Qolka Habeen Dhaxa Ilaa & Aroorta dambe markaas oo loo Gudbin doono Qaybta Soodhawaynta si Diiwaan gelinta loo dhamastiro & si Caafimaadkiisa loo Hubiyo
- 2- Waxa lagu soo celinayaa Qaybta soo Dhawaynta kedib marka Caafimaadkiisa la soo Hubiyo, si loo siiyo Dharkiisa & Alaabta Xabsiga.
- 3- Qaybta Soodhawayntu waxa ay horgaynayaan Maxbuuska Gudiga soo Dhawaynta kaas oo marka uu Tixgeliyo Xaaladdaha la Xidhiidha Maxbuuska oo dhan Gudigu u Magacaabo Qolka Jiifkiisa, Tababarkiisa & Shaqo gayntiisa
- 4- Majiro Maxbuus bedelikara Hoygiisa, ama Alaab Isaga lasiiyay Iyada oo aan jirin Ogo'aansho laga heli karo Gudiga soo Dhawaynta.

KUSIMAHA GUDOOMIAYAHGUDIGA SOO DHAWAYNYA.
QODOBKA 7AAD.

Sida uu dhigaayo Qodobka 21aad ee Xeeqan. maqnaansha ha Taliyaha xabsiga sabab kasta ha ku Maqnaadee (Hahaatee) waxa Xilka Gudoomiyaha Soodhawaynta la Wareegaaya Xubinta Ciidanka Halkaas Jooga Derojo ahaan ugu xiga Taliyaha Xabsiga.

QODOBKA 8AAD.
XILKA GUDIGA SOO DHAWAYNTA.

Gudiga Soodhawaynta oo uu Gudoomiye u yahay Taliyaha Xabsiga waa in ay :-

B- Waa in ay Deg-deg u arkaa Maxbuus kastaa marka uu Xabsiga soo Galo Ayna ka taliyaan Go'aanka Meelayntiisa.

T- Si buuxda ugu sheegaaa Maxbuus kasta oo soo gala Xabsiga wax alaale Wixii la xidhiidha Noloshhiisa Xabsiga Xeerka & Xeer nidaamiyaha gaar ahaan kuwa la xidhiidha Waajibkiisa & Xuquuqdiisa. Isla markaana waa in uu ka Dhaadhiciyaa Jidka uu u leeyahay Racfaan Qaadasho, Arji Cafis ah, ama dib u eegid Xukun & Xabsi Dhimid.

J- Udiyaariyaa Maxbuus kasta Tababar Shaqo hadii ay Mudadaa Xadhigiisu Ay suurto gelinayso Tababarkaas.

X- Uhabeeyaa Maxbuus kasta Shaqo gayn iyadoo la Tixgelinaayo Maxbuus Kasta Da'diisa. Karaankiisa, Dhaqankiisii Hore & Waayo Aragnimadii Aqoontiisa Xirfadiisa Gaar ahaaneed & Caafimaadkiisa.

KII- Lixdii Bilood mar uu eegaa Barnaamijka Tababarka Farsamadda Gacanta Ee Maxbuuska, waana in uu Tixgelyaa Shaqadda Maxbuuska ee Horumar Ka gaadhi waayay isaga oo ugu bedelaaya Qaybta ugu haboon Qaybaha kale Ee Tababarka Farsamadda Gacanta

C- Waa gaadhsiiinayaa Taliyaha Xabsiga Sugnaanshaha Maxbuuskasta oo Cusub Oo aan Shaqay Karin Sabab Caafimaad. Sida: -

Maskaxdda, ama Da'da si loogu habeeyo Shaqo Fudud oo ku Haboon.

QAYBTA AFRAAD.
NOLOSHA MAXAABIISTA & MAAMULKA XABSIYADDA DALKA JSL.
QODOBKA 9AAD.

FURIDA & XIDHIDDA XABSIYADDA.

1- Xabsiga waa in Maalin kasta la Furaa 6 Subaxnimo hadii aanay jirin sababo gaar ah oo keeni karta dib u dhigida Furista sida Nebad-gelyadda, Caafimaadka, & Hawada oo xumaata

2- Xabsiga waa in Maalin kasta la Xidhaa 5 Galabnimo lana hubiyaa Sugnaanshaha Maxbuus kasta oo ku Xidhan xabsiga in uu ku jiro Qollkiisa

- 3- Xil la kala wareegida Xabsiga Furistiisa & Xidhistiisaba waa in u goobjoog ka ahaadaa Sarkaalka Hawsha lihi (Duty officer) & kan Habsamida & ku Xigeenkiisa.

QODOBKA 10AAD
HURDADDA

- 1- Maxaabiistu waxa ay Seexanaysaa Qolal Waa wayn & Edegyo (Cells) hadba sida Dhismaha Xabsigu yahay. ama ay la noqoto Maamulka Xabsiga
- 2- Maxaabiista Labka ah & kuwa Dhediga ah Waa in Gooni loo kala hayaa waa na in lagu kala xereeyaa Guyro kala gaar ah. sida uu dhigaayo Qodobka 22aad ee Xeerka Xabsiyaddu Furayaasha. Qofuladda. Xabsiyadda haweenka waa in ay Gacanta ku hayaan Xubno Haween ahi. Xubin Lab ahina ma Geli karto Gaynta ama Xabsiga iyadoo aanay la soconin Dhedig. Maxaabiista Caruuta ah ee Cimrigoodu ka yaryahay 18 Sano waa in lagu hayaa Meel ka gaar ah Maxaabiista kale ee Waa wayn. hadii aanay meeshaasi ka jirin Xabsi u gaar ah inta loo Helaayo xabsiga Caruurta sida uu Dhigaayo Xeer Lr. 94/96. Soona baxay Bishii March 1996kii. Maxabiista Dhalin yarada ah ee Da'doodu u Dhaxayso 14-18 Sano waa in laga soo'caa Maxaabiista Waa-wayn loona hooyaa Meeshii hadba Suurtagal ah.

QODOBKA 11AAD
EDEGA TAKOORKA.

Xabsi kastaa waa in uu yeeshaa Meeshii Suragal ah Edeg Takoor oo loogu talagalay Maxaabiista Asluub Xumadda la Timaada. Edeg kasta oo Edegyadaas ka mid ah waa in uu Cadeeyaa Sarkaalka Caafimaadku ee Xabsigaa in uu u Qalmo Isticmaalka loogu Talagalay.

QODOBKA 12AAD
NADAAFADDA GUUD EE XABSIGA.

- 1- Waa in Maxbuuska la siiyo Saabuunta Dharka lagu Maydho. si Maxaabiista Nadaafadoodu u wanaagsanaato
- 2- Waxa mar walba Diiradda la saarayaa Nadaafadda Guud ee Xabsiyadda & meelaha Xabsiga la midka ah oo dhan.
- 3- Si loo dhawro Nadaafadda Guud ee Xabsiga Guryaha Jiifka ee Ee Maxaabiistu waa in ay lahaadaan Musqulo u gaar ah - (Flash Latrines).

QODOBKA 13AAD
BAADHISTA MAXAABIISTA.

- 1- Baadhista Maxaabiistu waa in ay u dhacdo Habka ugu Hufan si looga helo Wax alaalewixii Maamnuuc ah ee Maxbuusku Qarsanaayo IWM.
- 2- Waa in aan Maxbuuska lagu Qaawin Maxaabiista kale Hortooda loona Baadhin Baadhis u Dhaafsiisan Dul kataabad Korkiisa **(Rub Down)**
- 3- Soo gelida xabsiga ugu horaysa ee Maxbuusku soo galo wixii laga helo Baadhis ee madnuuc ah waa laga reebayaa. waana in la meeleeeyaa sida uu Dhigaayo Qodobka 20aad ee Xeerka xabsiyadda JSL.
- 4- Wax alaale wixii Maxbuuska laga helo Baadhis. ama Maraan marba si kale Inta uu Xabsiga ku jiro isaga oo Xukuman ama lahayn ama Garsuge ah waa lagala wareegayaa. waxayna kamid noqonaysaa Hantida Xabsiga sida uu dhigaayo Qodobka 65aad ee Xeerka JSL.

QODOBKA 14AAD.
HANTIDA MAXBUUSKA.

- 1- Soogelitaanka Maxbuuska Cusub hadii laga helo Alaabo aan Dhigaal lahayn (Perishable Nature) waa in lagu amaraa in uu ugu talo bixiyo sida ugu deg-dega hadan ee Suurtagal ah.
- 2- Soo gelitaanka Maxbuuska wax alaale wixii alaab ah ee Cudur Faafin keeni karta ee laga helo waa in si Deg-deg ah loo baabiiyaa iyadoo wax Magdhow ah oo Maxbuuska aanay jirin. sida uu dhigayo Qodobka 20aad Qaybtiisa 2aad ee Xeerka JSL.
- 3- Lixbilood kadib siidayntiisa. ama Dhimashadiisa oo la Baafiyay Maxbuuska Dadkiisa ama Waalidkiisa soo Doonan waayay Alaabta Xabsiga u Taalay sida uu Dhigaayo Qodobka 20aad ee Xeerku. waxa uu Taliyuhu ku Wareejinayaa Hantidaa Xabsiga.
- 4- Lix Bilood kedib dhaqan galka Xeer nidaamiyaha wax Alaale wixii Alaab ah ee Xabsiga lagu hayo ee oo aan Cidan soo sheegan waa la baafinayaa hadii la Gado wixii ka soo baxa waxa lagu wareejinayaa Hantida Xabsiga.

QODOBKA 15AAD.
QORAALKA TILMAAMAHA MAXAABIISTA.

- 1- Taliyaha Xabsigu waa in uu hubiyaa in la hubiyo Magaca maxbuuska Da'da. dhererka Calaamaddaha ugaarka ah & wa alaale wixii kale ee la xidhiidha Maxbuuskaa soo gelitaanka loona qoro hab laguna qoro qaabka loogu talo galay.

QODOBKA 16AAD.
U SHEEGIDA DHAQANKA XABSIGA MAXAABIISTA.

1- Maxbuus kasta soo gelitaankiisa waa in loo sheegaa wax alaale Wixii ku saabsan qaynunka lagu dhaqo Maxaabiista Kooxdiiisa ah xagga habsamida. waxa looga baahan yahay habka sharciga ah ee lagama-maarmaanka u ah in uu garto Xuquuqdiisa & Waajibaadka & sidii Naftiisa u Qabadiin lahaa Noloshu Xabsiga Taala.

QODOBKA 17AAD.
SAWIRKA

1- Maxbuus kasta oo Xukuman oo Xadhigiisu ka badan yahay Lix Bilood Waa in Sawir laga qaado. waana in Nuqulka Sawirkaaasi lagu dhejijaa Faylkiisa Asalka hore (One Negative) waa in la kaydiyaa Nuqul Sawarkaas ka mid ah. lamana siin karo Qof ama Hay'ada aan Sharcigu awood u siin

QODOBKA 18AAD.
CUNTADDA MAXAABIISTA.

1- Cuntadda Maxaabiista ee ku Xusan Qodobka 27aad ee xeerka waxa Ay ahaanaysaa sida ku Faah-faahsan Lifaaqa (B) Xeer-nidaamiyaha kaas oo Nuqulkiisa lagu dhejinaayo Meelkamid ah Xabsiga oo laga akhriyi karo.

2- Maxbuus kastaa waa in uu helaa Biyo Cabitaan ku Haboon oo uu Cabo.

3- Cuntadda ku tilmaaman Xubinta Koowaad Qodobka 28aad ee ku jira Cuna Cigaabeed waxa bedeli kara Taliyaha xabsiga isaga oo raacaya Taladda Saraakiisha Caafimaadka ee Xabsiga oo uu Cuskanaaya daryeelka Caafimaadka Maxaabiista.

QODOBKA 19AAD
HUGA MAXBUUSKA.

1- Huga Maxaabiista ee ku Xusan Qodobka 28aad ee Xeerku waxa uu noqonayaa Sida ku Faah-faahsan Lifaaqa (T) ee Xeer Nidaamiyaha.

2- Huga Xabsigu ugu yaraan waa in Todobaadkiiba Mar la Dhaqaa lana Isku bedelaa Huga Xabsigu waa in aanu ahaan mid Qof nimadiisa Maxbuuska waxyeelayn kara. ama hoos u dhigi kara

3- Marka Maxbuuska la gaynaayo Maxkamadda Warqad shaqo ama meel gaar ah oo aan loo baahnayan in la ogaado Maxbuus nimadiisa waxa loo ogolaanayaa Huga, ama Hugiisa kale oo aan muujinayn in uu Maxbuus yahay.

QODOBKA 20AAD.
GOGOSHA MAXAABIISTA

- 1- Gogosha Maxaabiista ee ku Xusan Qodobka 29aad ee Xeerku waxa ay ahaanaysaa sida ku faah-faahsan Lifaaqa ee xeer Nidaamiyahan
- 2- Gogosha Maxaabiista waa in la Qorexeeyaa sida uu hadba Amar ku bixiyo Taliyaha Xabsigu.

QODOBKA 21AAD.
QUBAYSIGAMAXAABIISTA.

- 1- Meeshii ay Suuragal tahay waa in Maxaabiista la siiyo Fursad uu maalin Kasta ku Maydhanaayo, si kastaba ha ahaatee waa in Maxaabiista korkooda la Nadiifiyo, lana siiyo sida hadba awoodu tahay Biyo & Saabuun.

QODOBKA 22AAD.
TIMO XIIRIDDA MAXAABIISTA.

- 1- Maxbuus kasta oo Xukuman Xadhigiisuna ka badan yahay Bil waa in Timaha Loo Jaraa. ama laga Xiiraa iyadoo la Tixgelinaayo Caafimaad kiisa. hadii uu leeyahay Gadh. ama Shaarubaha waa in laga gaabiyaa.
- 2- Haweenka Xidhan waa in aan Timaha laga jarin. hadii aan Sarkaalka Caafimaadku ee Xabsigu Caafimaad & Nadaafad danted Talo ku bixin in laga jaro. ama laga Xiiro.
- 3- Maxaabiista Garuseyaasha. ama Racfaanlaydda Timaha waa loo daynayaa Sidii ay ahaayeen markii ay Xabsiga soo galeen.
- 4- Hadii aanay wax u Dhimin Nadafadda & Caafimaadka Guud Timo Laha-haanshadda Maxbuusku. Maxaabiista Bisha u dambaysa Xadhigooda waa in aan laga Xiirin Timaha. hadii uu sidaas rabo sida Qodobkan ku xusan waxa reeban wax alaale wixii ku dhisan Aasaaska Diiniga ah ee la Xidhiidha Timo jarida & Gadh. Shaarub Xiiridda Qofka.

QODOBKA 23AAD.
JMICSIGA.

- 1- Maxaabiista oo dhan kuwa Caafimaad Xumida daraadeed Sarkaalka Caafimaadku reebay & kuwa Taag daran mooyee waa in ay helaan Jimicsi Joogto ah sida uu dhigaayo Amarka Joogtada ah. ama sida uu kolba ku taliyo Taliyaha Xabsigu Maxaabiista Fadhiga ku Hawlgasha. ama kuwa Takooran Edegyadda Gaarka ah waa in lagu siiyaa Banaanka. Edega ama Qolka Shaqadda Jimicsi aan ka badnayn Hal Saac Maalintii. hadii aan Sarkaalaka Caafimaadku Xabsigu si kale ku Talin. ama aan Daryeelka Nebad-gelyadda ka hor imaan.

QODOBKA 24AAD.
MIISAANKA MAXAABIISTA.

- 1- Maxaabiista Xabsiga Dheer oo dhan ee ku Xidhan xabsiyadda dhexe ama kuwa gaarka ah waa in Bishiiba mar la Miisaamaa. Koox-koox.galbaha Khamiista ah. ama Maalmaha Jimcaha. Maxbuus kasta waa in Miisaankiisa loogu qoraa Galkiisa.
- 2- Taliyaha Xabsigu waa in uu hordhigaa Sarkaalka Caafimaadka Maxaabiista uu Miisaankoodu aad u Hooseeyo ee uu Hoos u dhacay si loo baadho sababaha keenay in uu hoos u dhaco Miisaankiisu.

QODOBKA 25AAD.
MABNUUCIDA KHAMRADDA & WAXYAABAHADA KALE EE MASKADA DOORIYA.

Soogelitaanka Xabsiga waxa aan la ogolayn waxyaabahan Hoos ku Qoran. oo aan la siinin Maxbuuska. loona Ogolaan karin helitaankooda & ku dhaqankooda. waana sidan Hoos ku Qoran:-

- 1- Wax alaale wixii cabitaana ah ee Alcoholic ku jirto (**Alcoholic-Drinks**).
- 2- **Xashiishadda**
- 3- **Afyuunka**
- 4- **Heerooyinka**
- 5- **Kookiinta**
- 6- **Binjiga**
- 7- **Qaadka.**
- 8- **& Wax alaala wixii kale ee doorin kara, ama dooriya xiska Qofka.**

QODOBKA 26AAD.
SHAQADDA MAXBUUSKA

- b). Sida uu dhigaayo qodobka 25aad ee Xeerka Maxaabiista Xukuman oo dhan oo ay ku jiraan Maxaabiista Lahayayaasha ah. ee ay Hayntooda soo xalaaleeyeen Hay'adhii ku Shaqadda lahaa waa in ay ka Shaqeyaan meeshii loo diro. una shaqeeyaan habkii uu amarka ku dhiibo Taliyaha Xabsigu ama Taliyuhu.
- i). Meshii ay suuragal noqon karto waa in Shaqadda Maxaabiistu ku dhistaataa wadajir. Bulsho ahaan waa in ay wax Fa'iidaynayaan iyadoo Ujeeddadu ku Haboontahay Waxbarsho & Tacab kordhin.
- jj). Hadii ay u muuqato Taliyaha Xabsiga in Habsamida & Nabad-gelyada awgeed looga baahanyahay in aan Maxbuusku Shaqayn Maxaabiista kale dhexdooda. waxa uu awood u leeyahay Taliyaha Xabsigu in Maxbuuskaas gar ahaantiisa loogu Shaqeeyo.
- x). Taliyaha Xabsigu isaga oo Tixgelinaaya Talada Sarkaalka Caafimaadka Xabsiga ama Cuskanaayo sababo kale oo meel Mara ah waxa uu Awood u leeyahay in uu amro Maxbuuska gooni u Shaqaynaayay in Dib uga dhex shaqeeyo Maxaabiistii kale.

Kh)- ku shaqaynta ama tababar Shaqo ee Maxbuusku waxa ay bilaab-
Maysaa markii Go'aanka Xukunka Maxkamadii ugu horaysay
Ku dhawaaqday Maxbuuska Lahayaha ah waxa ku Shaqayntiisu
Dhaqan galaysaa marka Hay'addii Sharciga ahaan awooda u lahayd
Soo Xalaalayso hayntiisa.

QODOBKA 27AAD
MAXAABIISTA AAN SHAQAYN KARIN.

Wakhti kasta ha noqotee hadii la arko Maxbuuska Xukuman ama la haye ah in
aanu Shaqayn karayn Shaqo Caadi ah Xagga Caafimaadka. Da'da ama lin kale
awgeed Maxbuuskaasi waxa loo dhiibayaa Shaqooyinka Fud-fufud.

- B)- Tolmo Fufud.
- T)- Beer Qodida (Gardening)
- D)- Nadiifinta ama Shaqo kale oo Fudud
- X)- Sidii ay hadba Taliyaha Xabsiga la noqoto.

QODOBKA 28AAD
QORIINADDA SHAQADDA MAXAABIISTA.

Nabsi kastaa waa in Shaqadda Maxaabiista Maalin kasta loo qoraa looma
habeeyaa sida hadba Taliyuhu amar ku bixiyo.

QODOBKA 29AAD
SAACADAH SHAQADDA.

Saacadaha ay Maxaabiistu Shaqaynayaan waxa ay ahaanayaan hadba sida lagu
tilmaamo. Amaradda Joogtada ah inta laga soo saarayana waxa ay ahaanayaan
sida uu Taliyuhu Amar ku bixiyo.

QODOBKA 30 AAD.
CAYIMIN.

- 1- Taliyaha Xabsiga waxa ku waajib ah in uu ka hor tago waxa alaale
Wixii halis gelin kara daryeelka Maxaabiista Shaqaynaysa & Caafima
Adkoodaba.
- 2- Hadii Maxbuusku Dhaawacmo isga oo Shaqaynaaya Sababna ay u
Ahayd Dadaal Daridiisa. Feejigni La'aantiisa Taliyaha Xabsigu waxa
uu awood u leeyhay in uu amro in la Samarisiyo.
- 3- Hadii maxbuusku ku Dhaawacmo Shaqadda Xabsiga ama Dhaawac ku
yimid Dadaal daro ama Hawl gabid ka timid Xubin Ciidanka ka mid
ah markii laga baaraan dago dacwadiisa lana ogoodo sababaha keenay.

Dhaawacaasi Ciidanku waa in uu bixiyaa wixii Magdhow ah ee u Dhigama Dhawaca gaadhay Maxbuuska. kedibna Ciidanku waydiisto Wasaaradda Maaliyadda iyadoo la Waafajinaayo Shuruucda Dalka u Dejisan.

QODBKA 31AAD.
QIIMAYNTA ABAAL GUDKA.

- I)- Maxaabiista ka Shaqaysa Shaqooyinka Aqoonta u baahan kuwa xirfad yaqaanka ah hadii ay Shaqadu tahay mid wax soo saar leh waxa la Siinayaa Abaalgudkan soo socda una qoranta sida waafaqsan Qobka 26aad ee Xeerkan:-
- B)- Marka uu soo bandhigo Taliyaha xabsigu Maxbuus Asluub Fiican leh Heerka Shaqo ee wax soo Saarkiisuna uu sareeyo Aqoontiisuna gaadh-Siisantahay Heer Saanac, waxa uu Taliyuhu Awood u leeyhay in uu Ogaado Maxbuuskaasi oo kale inuu u gudbo heerka laad kaas oo abaal Gudkiisu yahay 2000/= . Maalintiiba in uu Shaqaynaayo .Lana siiyo Bil Kasta dhamaad keeda.
- T)- Marka Taliyaha Xabsiga La noqoto in Maxbuus Qof nimadiisa & - Aqoontiisu gaadhsiisan yihiin in loo Aqoonsado Farsamo-yaqaan Heer sare ah wuxuuna gelayaa Heerka Labaad ee Abaal marinta Dheeraadka ah. wuxuuna yeelanayaa Abaal gud gaadhsiisan 500/= Maalintiiba uu Shaqeeyo lana siiyo Bil kasta dhamaadkeeda.
- J)- Markay Taliyaha Xabsiga la noqoto in Maxbuus akhlaaqdiisu wanaag-Santahay loona Aqoonsado in uu yahay Farsamo-yaqaan, waxa uu gala Yaa heerka Sadexaad ee Abaal marinta Dheeraadka ah. wuxuuna yeelanayaa Abaalgud 300/= **Maalintii uu Shaqeeyo lana siiyo Bil kasta dhamaadkeeda.**
- X)- Maxabuuskii ka mid ah Maxaabiis haysa Shaqo wada Jir ah. oo wax Soosaar la baraayo Xirfad gaar ah waxa uu galayaa Heerka 4aad, waxa Uu yeelanayaa Abaal Gud 200/= Maalintii uu Shaqeeyaba, lana siiyo Bil kasta Dhamaadkeeda.
- 2- Ku magacaabid ama gaynta heerka koowaad waxaa leh Taliyaha mark-Uu warbixin ka helo Taliyaha Xabsiga. Xabsiga uu ku jiro Maxbuusku ama Madaxdda ka masuulka ah meesha uu ka shaqaynaayo Maxbuusku
- 3- Ku magacaabid ama gaynta heerka Labaad & kan Sadexad waxaa leh Taliyaha Xabsiga markii uu warbixin ka helo Madaxdda ka Masuulka ah Meesha uu Masbuusku ka Shaqaynaayo.

QODOBKA 32 AAD
KU DHAQMIDA ABAAL GUDKA.

- 1- Maxbuusku waxa uu awood u leeyahay inta uu Xukuman yahay inuu ku dhaqmo 1/3 00 ka mid ah Abalgudka uu Shaqaysto uuna siisto Alaab loo Ogolyahay. wixii hadhaa ah Taliyaha Xabsiga ayaa u Meelaynaaya si uu kayd ugu noqdo. waxaana la siinayaa Maxbuuska marka uu Xadhigiisu dhamaado.
- 2- Hadii uu Maxbuus uu doono in la siiyo Dhamaan ama Qayb ka mid ah Abaalgudkiisa Xaaskiisa. ama Ilmihiis, waa in loo Ogolaadaa markuu sidaa ka codsado Taliyaha Xabsiga

QODOBKA 33 AAD.
FASAXYADDA.

- 1- Daryeelka Nadaafadda Xabsiga & karinta Cuntadooda mooyaane Guud ahaan Maxaabiistu Shaqo male Jimcayaasha & Fasaxyada Qaranka.

QODOBKA 34 AAD
HABKA HEERAYNTA HOR U KACA.

Maxaabiista Xukuman oo Dhamaa waa in ay Xadhigooda ku dhamaystaan habka heeraynta Hor u kaca sida uu dhigaayo Qodobka 24 aad ee Xeerku. kaas oo loogu dhaqmi doono sidan soo socota:-

- 1- Habka heeraynta awgii. Dhererka Xadhiga Maxaabiista waxa weeyaan Isku darka Xukunada is dabajooga ah oo dhan.
- 2- Maxaabiista ku jirta Heer ka mid ah Habka Heeraynta hor u kaca. waa In ay shaqeeyaan. hadba sida ay Suuragal u tahay Shaqo wax Barasho ha qiimo.ama wax soo saarid leh.
- 3- Meeshii ay Shaqo jirto. Maxbuus alla Maxbuuskii Shaqadda hayaa. Waa in Abaalgud loo siiyaa sida uu dhigaayo Qodobka 31aad ee xeer-Nidamiyaha.

QODOBKA 35AAD.
HEERKA KOOWAAD.

Marka la Xukumo Maxbuus. waxa uu galayaa heerka Koowaad wuxuuna ku jirayaa heerkaas Mudo Hal sano ah. ama hadii uu yahay Maxbuus Xukunkiisu ka yar-yahay Hal Sano. Mudadda Xadhigiisa oo dhan Maxbuuskaas lama gayn karo Heerka Labaad isaga oo la yimaada Habsami Xumo ama Mutaysi mooyaane isla markaana Sadexdii Biloodba ee mudadaas ugu dambeeya aanu la iman wax Dambi ah.

QODOBKA 36AAD.
HEERKA LABAAD.

Maxbuuska u gudbaaya Heerka Labaad waxa uu Heerkaas ku irayaa mudo laba Sano ah. umaana gudbi karo Heerka Sadexaad isaga oo layimaada Habsami & Akhlaaq Wanaag mooyee. Lixdii Bilood ee Mudadaas u dambeeyana aan wax Dambi ah la iman.

QODOBKA 37 AAD.
HEERKA SADEXAAD.

Maxbuuska u gudbaaya Heerka sadexaad waxa uu ku jirayaa Heerkaas mudo dhan 4 Sano. uma Gudbi karo Heerka gaarka ah isaga oo la yimaada Habsami & Akhlaaq Fiican mooyee. Sanadkii Mudadaas ugu dambeeyana aan la iman wax Dembi ah.

QODOBKA 38 AAD.
HEERKA GAARKA AH.

Maxbuuska u gudbaaya Heerka gaarka ah wuxuu ku Dhamaysanayaa Xadhigiisa inta ka Dhiman Heerkaa.

QODOBKA 39AAD.
ASTAAMO U GAAR AH HEERARKAKALALADI WAN.

Taliyuhu waxa uu Awood u leeyahay in uu siiyo astaamo kala duwan Maxaabiista ku jirta Heerarkaasi kala gedisan.

QODOBKA 40AAD.
HOOS U DHIGA HEERKA.

- 1- Heerka gaarka ah & Heerka Sadexaad mooyaane Taliyaha Xabsigu wuxuu Awood u leeyahay in Maxbuuska uu Dambi ka yimaado ama Anshax Xumi u geeyo Ciqaab Heerka uu ku Jiro kan ka Hooseeya Maxbuuska ku jira Heerka gaarka ah & kan Sadexaad ee la yimaad Dambiyo ama Anshax Xumo Taliyaha Xabsigu wuxuu ka bixinayaa Xog waran Maxaabiistaasi. isagoo waydiisanaaya Taliyaha in la geeyo Maxaabiistaasi Heerka ay ku jiraan kan ka Hooseeya.
- 2- Maxabuus kii herkaas hoose loo dhigay kuma noqon karo Heerkiisii hore Isagoo ku jira Lixdii Bilood ee Heerka dambe mooyaane wax Dambi ahna la iman Mudadaas.
- 3- Maxbuuskii Laba Jeer Hoos loo dhigo ee Heerkiisii mar dambe laguma Celin karo Heerkiisii hore iyada oo ay jirto Sababo Tixgelin oo Taliyuhu tixgeliyay mooyaane markaas oo la siin karo Maxbuuskaas Fursad kale.

QODBKA 41AAD
ABAAL MARIN DHEERAAD AH.

Hirgelinta habsamida maxaabiista & Shaqo u Tababarkooda awgeed, waa in Taliyuhu ka Dhisaa Xabsi kasta Hab ama Hababka Abaal Marin dheeraad ah una Qalmo Maxaabiista ku kala jirta Heerka kala duwan.

QODOBKA 42AAD
HEERARKA ABAAL MARINTA DHEERAD KA AH.

Abaal marinta Dheeraadka ah ee maxaabiista ku jirta Heerarka kal duwan waxa ay ahaanaysaa sidan soo socota:-

b)- HEERKA LABAAD.

Marka uu Maxbuusku u gudbo Heerka labaad wuxuu yeelanayaa:-

- 1- In Hanuuniye loo Magacaabi karo
- 2- In uu doono Meel uu ku dhaxmari karo Ilaalis La'aan
- 3- In uu doorankaro Barashada Xirfadda uu Jecel yahay ama uu sii wato Xirfada uu Hore u yaqaanay.

1)- HEERKA SADEXAAD.

Marka heerka Sadexaad u gudbo maxbuusku wuxuu yeelanayaa in abaalmarin dheeraad ah uu ku lahaa Heerka Labaad, waxa kale oo uu yeelanayaa:-

- 1- Haduu doono in uu Guriga Dibada ka joogi karo Xidhitaanka Xabsiga Duhurnimo
- 2- Hal Labis oo dheeraad ah & Saabuunta oo loo Laban La'aabo markii Saabuun la bixinaayaba
- 3- Hal buste oo Dheeraad ah

j)- HEERKA GAARKA AH.

Maxbuuska ku jira Heerka gaarka ah wax uu yeelanayaa:-

- 1- Wax alaale wuxuu yeeshay marka uu ku jiray Heerka Sadexaad
- 2- Sakiin Xiirasho Todobaadkiiba Hal mar in la siiyo
- 3- Dhiin sole Hal Xabo Lixdii Biloodka
- 4- Isku Joog Dacas ah Hal Sadexdii Biloodka
- 5- Joodari (80X1.80) Hal Xabo
- 6- In la Xareeyo Hal Saac kadib Xidhitaanka Xabsiga

QAYBTA LIXAAD.
CAAFIMAADKA MAXAABIISTA.

QODOBKA 43AAD
WAAJIBAADKA GUUD & XILKA SARKAALKA CAAFIMAADKA.

- 1- Sarkaalka Caafimaadka ee lagu Xusay Qodobka 31aad ee Xeerkan waa Inuu :-
 - b)- Maxabuus kasta Baadhaa si is daba Jooga ah
 - t)- Baadhaa Maxbuus kasta oo Dil loo haysto, ka Dilka lagu Xukumay Ama Takooran.
 - j)- Kormeeraa Maxaabiista Shqaysa Wakhti ka Wakhti
 - x)- Wargeliyaa Taliyaha xabsiga marka uu arko Maxbuus aad u Buka oo u baahan wax ka Qabasho Dhaafsiisan Awoodiisa
 - kh)- Uguyaraan Bishii mar uu Kormeeraa Xabsiga oo Dhan, isaga oo Fiiro gaar ah siinaaya Alaabta wax lagu Kariyo & Qalabka Caafimaadka ee Xabsiga.
- 2- Sargaalka Caafimaadku waa inuu baadhaa Maxaabiista Wakhtiyadan Soo socda:-
 - b)- Soogelitaanka Maxbuuska, Markii Maxbuuska loo Bedelo Xabsi kale
 - t)- Bixitaanka Maxbuuska
- 3- Hadii Maxbuus Xadhigiisu dhamaado markuu baxayo lagu arko ama Uu qaado Cudur Joogto ah ama mid Faafa waxaa la horgaynayaa Sarg-Kaalka Caafimaadka waxaana lagu Dhaqmayaa hadba talada uu bixyo Sarkaalka Caafimaadku.
- 4- Hadii la arko in Maxbuus qaba Cudur faafa ama la kala qaado Sarkaalka Caafimaadku waa in uu markaaba Talaabooyin ka qaadaa ku haboon, kana hortagaa si aanu Cudurkaasi ugu Faafin Xabsiga & Maxaabiista.
- 5- Sarkaalka Caafimaadku hadii uu arko Kormeerkiisa & Baadhistiisaba in loo baahan yahay in wax laga bedelo Xagga Shaqada, Cuntada Dharka, Jiifka ama Alaabta la xidhiidha Maxbuuska ama Koox Maxaabiis ah wuxuu awood u leeyahay in uu soo bandhigo una sheegto Taliyaha Xabsiga rayigiisa oo Qoraal ah.

QODOBKA 44AAD.
BUUGA UU MAAMULAAYO SARKAALKA CAAFIMAADKU.

Sarkaalka Caafimaadku waa inuu Maamulaa Buuggaagta & Galalka hoos ku qoran:-

- b)- Buugga muujinaaya Magaca Cudurka & Daawadda Maxbuuskasta oo Buka la siiyay Buugga si buuxda ugu muujinaaya Maxuus alaale Maxbuuska ku Dhinta Xabsiga oo aan ahayn kuwa ah kuwa lagu Fuliyay oo Cadaynayasa.
- 1- Dib u raaca Caafimaadkiisa.
2- Sababata Dhimashada
3- Daawaynta
4- Xogwaran ku saabsan muuqiisa Dhimashadiisa kadib (markii la sameeyo Dhimasho ka dib baadhis) oo ay weheyaan wixii tilmaamo gaar ah ee ay la noqoto in loo baahan yahay bixiyo.
- j)- Diiwaano uu ku Qoro Faalooyinka & Talooyinka uu hadba ka bixiyo Xabsiga & Maxaabiista.

QODOBKA 45AAD.

TALAALKA & TURISTA MAXAABIISTA.

- 1- Hadii ay la noqoto Sarkaalka Caafimaadka, lagama-maarmaan Caafi-Maadka Maxaabiista ama ka Xubnaha Ciidanka ee Xabsiga ka Shaqeeya ama Dadwaynaha awgii. wuxuu Awood u leeyahay inuu qalqaaliyo Talaalka ama Durista Maxaabiista ama Xubnaha Ciidanka.
- 2- Maxbuuska diida in la Talaalo ama la Duro waxaa loo qaadanaaya Inuu galay Gef ka mid ah Gefefka yar-yar ee Xabsiga. sida ku xusan Qodobka 44aad Xarafka Kooraad ee Xeerka Xabsiyadda.

QAYBTA 7AAD.

HABSAMIDA MAXAABIISTA.

QODOBKA 46AAD

TALAABOYINKA HABSAMIDA.

Talaabooyinka Habsamida & Nabad-gelyadda ee laga qaadaayo Maxaabiista waa in lagu dhaqaa oo kali ah sida ay dhigayaan Xeerka Xeerndamiyaha & awaamiirta Joogatada ah.

QODOBKA 47AAD
ISTICMAALKA XOOGA.

- 1- Xubin Ciidanka ka mid ahi ma Isticmaali karo Xoog aan loo baahnayn. Hadii loo baahado in Xoog la isticmaalo waa in ula Jeedadiisu ku habaysan tahay daryeelka, Xasiloonida & nidaamka waa in aanu dhaaffsiisnayn Heerka loo baahanyahay.
- 2- Xubin Ciidanka kamid ahi kuma fulin karto Maxbuuska Ciqaab aanu Xeerku awood u siin.
- 3- Daandaansi. Awood sheegasho, Anshax Xumo & ku Xad gudub Bin-Aadanimo uma banana Xubin Ciidanka ka mid ah inuu kula dhaqmo ama kula kaco Maxbuuska.

QODOBKA 48AAD.
CUNTO CIQAABEED.

Cuno Ciqaabeedka ku Xusan Qodobka 54aad ee Xeerka. wuxuu ku faah-faahsanyahay Lifaaqa (X).

QODOBKA 49AAD.
KU TAKOOR EDEGA GAAR KA AH.

- 1- Maxbuusk ku jira Ciqaab (Edega Takoorka) Asluub xumo awgeed waxaa arki kara oo kaliya:-
 - b)- Xubnaha Gudiga Booqashadda Xabsiyada
 - t)- Sarkaalka Caafimaadka Xabsiga
 - j)- Taliyaha Xabsiga ama Wakiilkiisa
 - x)- Xubnaha Ciidanka ku Shaqada leh
- 3- Maxbuuskii ku jira Ciqaab Adag, Takoor waa inuu soo Kormeeraa had Iyo Goor Maalintii & Habeenkiiba Xubno Ciidanka ka mida ah oo uu Taliyaha Xabsigu Hawshaas u Xilsaaray una Magacaabay.

QODOBKA 50AAD.
CIQAAB DHAMAYSASHO.

Maxbuuskii loo bedelo Xabsi kale isaga oo ku jira Edega Takoorka Asluub Xumo awgeed, wuxuu ku dhamaysanayaa Ciqaabtii qaybtii u hadhsanayd Xabsiga Cusub ee loo bedelay.

QODOBKA 51AAD
QALABKA XASILINTA.

- 1- Qalabka Xasilinta, sida Katiinadaha, Sil-silada ha Gacmaha & Faro Duugga waa in aan loo Isticmaalin Ciqaab ahaan Qalabka Xasilinta waxa loo baahan yahay sidan:-
 - b)- Kahor taga Fakashada marka Bedel jiro, ama Maxbuus Maxkamad ama ama dhakhtar la horgaynaayo iyada oo lagu talo galaayo in laga furo Maxbuuska Qalabka Xasilinta ama la horkeenaayo Hay'adda Cadaaladda Waxa ogolaan kara Taliyaha Xabsiga .
 - t)- Amarka Taliyaha Xabsiga si looga ilaaliyo Maxbuuska inuu Nafiisa ama Nafkale halis galiyo ama inuu khasaare gaysto.
 - j)- Asbaab Caafimaad ku dhisan markuu ku taliyo Sarkaalka Caafimaadku
- 2- Habka & sida loogu Isticmaalaayo Qalabka Xasilinta, waxa soo Habay-Naaya Taliyaha wuxuu soo saarayaa Amarada Joogtada ah Qalab Xasilinta Isticmaalkiisu waa in aanu dhafin inta & hadba mudada loo baahan yahay.

QODOBKA 52AAD.
MAAMULKA BUUGGA CIQAABTA.

- 1- Waa inuu Xabsi kasta yaalaa Buugga Ciqaabtu
- 2- Taliyaha Xabsigu waa inuu Buugga galiyaa ama amraa in la geliyo Maxbuus kasta oo lagu Ciqaabaayo Qodobka 50aad & 55aad ee Xeerka isagoo Muujinaaya Taariikhada nooca Dambiga & Ciqaabta.

QAYBTA SIDEEDAAD.
BOOQASHOYINKA & QORITAANKA & WARQADDAHA
MAXAABIISTA XUKUMAN.

QODOBKA 53AAD
BOOQASHADA & QORITAANKA WARQADDAHA.

- 1- Iyada oo lagu Xidhaayo Shuruudaha lagama-maarmaanka ah uu u Moodo Taliyaha Xabsigu dhawrtaanka Nabd-gelyadda, Habsamida Nidaamka Xabsiga & ka hortaga Dembiyada, Xidhiidhka Maxaabiista Xukuman ay la yeelanayaan Bulshada oo aanu ku jirin Qareenadoodu wuxuu ahaan doonaa sidan soo socota:-
 - b)- Soogelitaanka Maxbuuxka wuxuu Xaq u yeelanayaa Warqada uu qorto & Booqasho aan ka badnayn 20 Daqiiqadood.
 - t)- Bedelaada Maxabuuska xabsi kale loo Bedelaayo waxa uu Xaq u leeyahay Warqad uu u Qorto Qaraabadiisa
- 2- Wixii aan ahayn Xarfaha (B) & Xarfaha (T) ee ku Xusan Booqashooyinka & Qoritaanka Warqadaha Maxaabiista Xukuman waxa ay ahaan doonaan sidan soo socota:-

- b)- Maxaabiista Xukuman ee ku Jirta Heerka Koowaad waxa ay Xaq u leeyihiin Warqado & Booqasho 20 Daqiiqadood ah Labadii Todobaadka mar.
- 1)- Maxaabiista Xukuman ee ku Jirta Heerka gaarka ah waxa ay Xaq u leeyihiin in ay Qortaan Laba Warqadood Helaana Laba Booqasho oo 20 Daqiiqadood midkiiba Todobaadkiiba mar.

QODOBKA 54AAD
BOOQASHADDA MAXAABIISTA BUGTA.

Hadii uu Maxbuuska Bukaa Codsado in Qof Qaraabadiisa Dhaw ka mid ah oo uu soo booqdo. Taliyaha xabsigu wuxuu awood u leeyahay inuu Ogl'aado Booqashadaas isaga oo tixgelinaaya Daryeelka Nabad-gelyadda & Talada Sarkaalka Caafimaadka Booqashadaasi waxa ay u dheertahay Maxbuuska Booqashooyinka ku Xusan Qodobka 53aad.

QODOBKA 55AAD
BOOQASHADA UU MAXBUUSKU SOO BOOQANAAYO QOF
QARAABADIISA AH OO DHINTAYAMA DHIMANAAYA.

Hadii Maxbuus ka Dhinto Aabo, Hooyo, Afadiisa, Ilmihiisa, ama Walaalihiis oo Maxbuuskaasi Codsado inuu soo Booqdo Qofkaas ama ka qaybgalo Aaskiisa. Taliyaha Xabsigu isaga oo Tixgelinaaya Daryeelka Nabad-gelyadda wax uu awood u leeyahay inuu Maxbuuska u Ogol'aado Booqashadaas ama ka qaybgalka Aaska Maydka, markaas oo kale waa in ay jirtaa warbixin Qoraal ah oo ka soo baxday Maamulka Cisbitaalka, Madaxdda Qaybta Booliska, Xoghayaha Degmadda, ama Hay'adii kale ee Warbixin Sugan ka dhiibi karta Cadaynaysa jiritaanka arrintaasi

QODOBKA 56AAD
SHURUUDAHA LA XIDHIIDHA BOOQASHADDA.

- 1- Sadex Qof tiro kabadan ma booqan karto Maxbuuska isku mar.
- 2- Booqashada Maxbuuska la soo booqanayaa waa in ay ahaataa Saacadaha Shaqadda ee Xabsiga ama markii kale ee ay la noqoto Taliyaha Xabsiga.

Hase-yeeshee, Sinaba uma dhici karto in laga Ogola'ado Booqasho Xidhitaanka Galabnimo ee Xabsiyadda kadib.

- 3- Xubinta Ciidanka ka mid ah oo loo Xilsaaray in uu korjoogo Booqashadda waa in ay jirtaa, waana inuu joogaa meel u dhow oo uu ka maqli karo waxa lagu wada hadlaayo ama ka arki karo waa in ay ku wada hadlaan Af uu garanaayo Askariga Ilaalintayaa Taliyaha Xabsiga oo si kale Amar ku bixiya mooyee.
- 4- Xubinta Ciidanka ahi wuxuu awood u leeyahay inuu Joojiyo Booqashada

Hadii uu dareemo Sheekadu in ay waxyeelaynayso nidaamka Xabsiyada ama ay ka horjeedo Danta guud ee Qaranka amba Cadaaladda isla markaana waa inuu gaadhsiiyaa arrintan Taliyaha Xabsiga Talaabadii kale ee ku haboon lagu qaado

- 1- Xubinta Ciidanka ee loo Xilsaray Booqashadu wuxuu awood u leeyahay Qof kasta oo Booqasho ugu yimaada Maxbuus inuu Magaciisa waydiiyo & Meesha laga helaba. hadii shaki ka galena wuxuu awood u leeyahay in uu baadho ama la baadho Qofka Booqashada ku yimid iyadoo aanu Maxbuusku arkaynin & Dadka kale ee Booqashada ku yimid aanay ka arkaynin . baadhitaanka waxa Fulinaaya Xubin Lab. ama Dhedig ahba. hadba Qofka la badhayaa ka uu yahay.
- 5- Ay Booqashadda Maxaabiista Qaarkood waxa ay ku Xidhan tahay Ogo-Laanshaha Maxkamada soo Xidhay, sida (Lahaya`yaasha) U.

QODOBKA 57AAD.

SHURUUDAHA LA XIDHIIDHA QORTAANKA WARQADAHA.

Waxaa waajibaad ku ah Taliyaha Xabsiga ama Xubinta kale ee uu Xilsaray inuu u akhriyo warqad kasta oo socota ama ka timid Maxbuuska haday la noqoto Warqadaasi mid ay ku qoranyihiin waxyaabo aan la Ogolan karin bixitaanka ama soo gelitaanka Xabsiga. wuxuu Taliyaha Xabsigu Xubintii kale ee loo Xilsaray awood u leeyahay inuu joojiyo Warqadahaas una sheego Maxbuuska Joojinta warqadahaas haday tahay mid Baxaysa. fursadana uu u siiyo inuu mar Labaad soo Qorto kana reebo wixii la diiday hadii uu ku soo celiyo waxyaabihii la diiday Xaqii Qortaanka Warqadu wuu ka lumayaa.

QODOBKA 58AAD

LUMISTA XAQA QORITAANKA WARQADAHA & BOOQASHOYINKA.

- 1- Maxbuuska la yimaada Anshax Xumo ama ku Gafa Habsamida Xabsiga wuxuu awood u leeyahay Taliyaha Xabsigu Ciqaab ahaan inuu uga qaado xaqii Qoritaanka & inuu helitanka Warqadahaba & Booqashooyinka mudo aan ka badnayn Sadex Bilood.
- 2- Maxbuuska mudadaa uu ku jiro Ciqaab Asluubeedka. ma yeelan karo Booqasho hase ahaatee wuxuu Taliyaha xabsigu awood u leeyahay inuu u ogolaado Qoritaanka Warqada uu Xaqa u leeyahay.

QODBKA 59AAD
BOOQASHOYINKA & WARQADAH GAARKA AH

Taliyaha Xabsigu wuxuu awood u leeyahay inuu Ogola'ado inuu Maxbuuskus helo Warqada gaarka ah, ama Booqasho gaar ah markii ay Maxbuuska la soo gudboonaato arrimahan hoos ku qorani:-

- B)- Dhimasho ama Jiro Culus oo ku timid Qof ka mid ah Qoyskiisa
- T)- Hawl ama arrimo Qoys oo Deg-deg ah
- D)- Tabaabulsho la Xidhiidha Shaqo helida ama kaalmo kale Bixitaanka Maxbuuska.
- X)- Ahaalgud ahaan Shaqo Fiican ama Asluub Wanaag uu la yimid.

QODOBKA 60AAD
BOOQASHOYINKA QAREENADA.

- 1- Taliyuhu wuxuu awood u leyahay inuu Ogola'ado Aragtida Qareenkiisa Isaga oo raacaaya markasta Sharciiga Dalka wixii la xidhiidha Daawadiisa ama Racfaanka Daawadiisa.
- 2- Taliyaha Xabsigu waa in u Fududeeyaa Qareenka Maxbuuska soo Booqanaaya Tabaabushihii Aragtida una siiyaa Wakhti si uu ugala saajoodo Maxbuuska wixii Arrimo ah ee la Xidhiidha Daawadiisa
- 3- Maxbuusku wuxuu ka la Xidhiidhi karaa Qareenkiisa Hawlo kale oo uu u bahanya- hay in Sharci ahaan wax looga qabto Aragtidiisu waxa ay ku Xidhantahay Ogola'aanshaha Maxkamadda Sare ama Xeer Ilaalinta uu u Xidhanyahay.

QODOBKA 61AAD.
BOOQASHOYINKA & WARQADAH MAXAABIISTA KALE.

Awoodda Qodobka 53aad & 54aad ee Xeerka nidaamiyaha, lana xidhiidha Booqashooyinka & Qoritaanka Warqadaha waxay samaynaayan Kooxaha Maxaabiista ah iyadoo lagu Xidhaayo Shuruudahan hoos ku Qoran:-

- b)- Lahayayaasha hayntooda ay soo Xalaalaysay Hay'addi Shariga ahaanta awoodda u lahayd waxa Taliyaha xabsigu Ogola'aan karaa Qoritaanka Hal warqad & hal Booqasho oo 20 Daqqiqadooda ah Todobaadkiiba mar
- t)- Lahayayaasha hayntoda ay soo xalaalaysay Hay'addi Sharci ahaanta awoodda u lahayd waxa Taliyaha Xabigu ogola'aan karaa Qoritaanka Hal warqad & Hal Booqasho 20 Daqqiqadood ah Todobaadkiiba mar.

j)- Lahayayaasha hayntooda aanay soo Xalaalayn Hay'adii sharci ahaan awooda u lahayd waxa Booqashada Qoraal ahan ugu soo ogolaanaya gudoomiyaha Gudiga Nabad-gelyadda Soomaali- Laand ama Hayaddii kale ee sharci ahaanta awooda u leh ka hor intaanay bixin ama gaadhin Gacanta Maxbuuska waxa Booqashada Todobaadkaa u soo Ogola'anaya Madaxdda Nabad-gelyadda Soomaali Land, ama helitaanka Waraaqaha Maxaabiista Noocaas ah waxa Baadhid ahaan loogu dirayaa Nabad-gelyadda Soomaali-Land, ama Hay'adii kale ee Sharci ahaan Awooda u leh ka hor intaanay bixin Ama gaadhin Gacanta Maxbuuska

J- Maxabuuska Garsugaha ah waxa loo Ogloyahay:-

- 1- Qoritaanka Hal Xaashi oo uu u qorto Qoyskiisa Todobaadkiiba mar & hal Uu u qorto Qareenkiisa hadii uu sidaas warsado.
 - 2- In uu Todobaadkiiba mar arko Xubno ka mid ah Qoyskiisa ama Saaxiiba-Dii kuwaasi oo sita Xaashi ogol'aansho uu u soo saxeexay Garsoore Dac-Wadiisa Gacanta ku hayay, ama Xeer-ilaaninta Sharci ahaan awooda u leh.
- X Maxbuuskii loo soo xidho gabid Bixin Ganaax oo ka soo jeeda amar Xukun la gaga doonaayo in uu bixiyo. Waxaa taliyaha Xabsigu awood u leeyahay inuu Ogolaado Maxbuuska Aragti Saaxibadii ama Qoyskiisa maalin kasta Todbaadka Dhexdiisa Saacadaha Shaqada ama la Xidhiidha Qoritaan Warqadeed oo uu la yeesho Xubnahaas si loogu Fududeeyo Xubnaha Lacagtaas oo Mutaysiin karta Bixitaankiisa.

QODOBKA 62AAD.

BOOQASHOYINKA & QORTAANKA WARAAQAHA MAXAABIISTA SHISHEEYAHA AH.

- 1- Taliyaha xabsigu wuxuu awood u leeyahay inuu u ogola'ado Maxaab-Biista Shisheeyaha ah Hay'addaha Dubalamaasiga ah & Safaaradaha ka wakiilka ah Dal koodii.
- 2- Maxaabiista ka tirsan Dalalka Shisheeye ee Jamhuuriyadda Soomaali-Laand aanu Wakiil ka Fadhiyin & kan maganta ah ama aan Dal lahayn (Rafugees and Stateless) waxaa Taliyaha Xabsigu awood u leeyahay inuu u ogolaado in u Xidhiid la yeesho Hay'addaha Dubla masiga ah ee maamusha Danaha Dawladiisa ama Hay'adii kasta ee wadani ah ama Caalami ah oo ay Shaqadu tahay in ay Ilaaliso ama dhawrto Dadkaas oo kale.
- 3- Booqashooyinka & Qoritaanka Waraaqaha la Xidhiidha Maxaabiista Ku xusan Xarafka 1aad & 2aad ee qodobkan, waxay ku Xidhan yihiin oglaanshaha Taliyaha Guud ee Ciidanka.

QODOBKA 63AAD
BOOQASHOYINKA XEER ILAALIYAHA KU XIGENKIISA &
WAKIILADIISA.

Xeer -Ilaaliyaha Guud, Ku Xigeenkiisa & wakiiladiisuba waxay Booqasho kormeer ku tegi karaan Xabsiyada, wixii ay ku soo arkaana Xabsiyadaas ay soo booqdeena waxay warbixin & Tusaale u soo gudbinayaan Taliyaha Guud ee Ciidanka Asluubta JSL, Culima awdiinka Aqoonsi ka haysta Wasaradda Garsoorka waxay Booqasho ku tegi karaan Xabsiga . iyaga oo Talo guud ka bixn kara Hanuuninta & wacyiga Islaamka. Taliyaha Ciidanka Asluubtu wuxuu Magacaabi karaa Dad gaar ah oo aqoon u leh Diinta Islaamka Wacyigelinta & Hanuuninta Maxaabiista.

QAYBTA SAGAALAAD.
XIDHIIDHKA MAXKAMADAHA & MAXAABIISTA.
QODOBKA 64AAD
KALA SAARISTA MAXAABIISTA.

Si loo sugo kala saarista Maxaabiista xukuman & kuwa aan xukunayn loona fuliyo awaamiirta ku dhigan Qodobka 23aad ee xeerka, markii Maxbuus Garsuge ah ama Lahaye ah uu ku dhaco xukun, waa in Maxkamadda ama Hay'adda Xukuntay ama Go'aan ka gaadhay soo raacisaa Jideeyaha Xukunka laga helaayo Shuruudaha ku xusan Qodobka 41aad ee Xeerka habka Ciqaabta maqnaanshaha ah ama kedib ama dib u dhaca Jideeyuhuu wuxuu Maxbuuska Mutaysiinayaa inuu baaji ku ahado Garsuge nimada.

QODOBKA 65AAD
SIIDAYN MAXBUUS MAXKAMADDA HORTEEDA.

Markii Maxkamadda ama Hay'add kale ee Sharci ahaan awooda u lihi Go'aan ka gaadho in Maxbuus Maxkamadda horteeda ama Hay'adda horteeda lagu sii dayyo kaasoo Xukunsane Garsuge Lahaye ah Maxkamadii ama Hay'addii sii daysay waa in ay isla markiiba gaadhsiisaa Go'aanka Xukunka Maxbuuskaas Hay'addii Masuulka ka ahayd si tabaabulshihiiisa siidaynta loo Fuliyo si Deg-deg ah.

QODOBKA 66AAD
SOO HORJOOJIN MAXBUUSKA MAXKAMADDA HORTEEDA.

Sida ku xusan Qodobka 18aad ee xeerka, markii Maxkamadu waraysato in la horkeeno Maxbuus, waxay Maxkamadu toos ugu diraysaa amar Qoraal ah Taliyaha Xabsiga Maxabuuskaasi ku jira Xabsiga waxaa Amarkaas Saxeexay Gudoomiyaha Maxkamadda ama Garsoore ka tirsan Makamadda Warsanayana maxbuuska, hadii Qofka kaxaynaya aanu ahayn Xubin Ciidanka ka tirsan Gacanta ku haya

Maxbuuskaasi, waa in la Xaqiijiyaa Shuruudahan Hoos ku Qoran kadibna laga Saxeexaa Qofkii kaxaynaayay Balanqaadka Maxbuuskaasi.

B)- Xaashida Aqoonsiga Ciidanka uu ka Tirsan yahay.

T)- Magaciisa oo sadexan

J)- Lambarkiisa.

Tilmaamaha kor ku Xusan waxa lagu Qorayaa Diiwaanka Irida Xabsiga.

QODOBKA 67AAD
WARGELINTA MAXBUUS AMA MAXKAMADEED.

Markii maxbuus lagu wargelinaayo Amar maxkamadeed ee la Xidhiidha Dacwadiisa ama Tuu Marag ka yahay ama ta Madaniga ah waxaa Maxmaddu toos ugu diraysaa qaabkii wargelinta. Taliyaha xabsigu waa in uu markaaba gaadhsiiyaa Maxbuuska wargelintaas kana Saxeexaa Qaabkaa Maxkamadii soo Dirtay.

QODOBKA 68AAD
SUGIDA EEDAYSANHA XABSIGA GUDIHIISA.

Markii loo baahdo Sugnaansho Eedayane ku jira Xabsiga in Xubin ka Tirsan Ciidanka Booliska ay Fulinayso Hawshan waxa Amar qoraal ah sidaa ku bixinaaya garsoore ama xeer Ilaaliye. Xubinta Booliska ah ee Hawshaa Fulinaysaa waxay awood u leedahay in ay Booqasho ku tagto Xabsiga Wakhti munaasib ah oo ay Hawshaa Fuliso Taliyaha Xabsigu waa inuu u habeeyaa Tabaabulshaha la xidhiidha Fulinta Hawshaas.

QAYBTA TOBNAAD.
XABSI DHIMIS.
QODOBKA 69AAD
MUDADA & XABSI DHIMIDA XUKUNKA.

- 1- Mudada Xukunka Xadhiga Maxbuusku waxay Bilaabmaysaa loogana Tirinaayaa Maalintii qabashada sida ku dhigan Qobka 45aad XCS.
- 2- Mudadda Xukunka Xadhiga ee Maxbuuska oo ku Cad Sanado bilo & Maalmo waxay tahay Bisha & sanadaha Kaalandarka ah (**Celinder Months and Years**).
- 3- Maxbuuska Waa in la hayaa Tan & maalinta u dambaysa Mudadda uu ku Xukuman yahay.
- 4- Markastoo Xukun Dil ah loo bedelo Xadhig Mudadda Xukunku waxay ka bilaabmaysaa Maalinta Qabashada.

- 5- Markastoo Xukun Dil ah laga Dhigo Xabs' Daaim ama Xukun Sanado ah Mudadda Xukunku waxay ka bilaabmauysaa xabsi Dhimidda awgeed Taariikhda Maxbuuska la Qabtay.
- 6- Marka Maxbuus lagu Xukumó Ganaax & Xadhig ama Ganaax Gadid xadhig wuxuu Xabsi dhimid ku yelanayaa Qaybta Xukunka Ganaaxa ama Mudadda uu Xabsiga ugu jiro Bixin La'aan Ganaaxaas.
- 7- Maxbuuska Xukumana ee Washa loona Bedelo Dhakhtarka Masxadda markii la Xaqiijiyo Waalidiisa wuxuu Xaq u yeelanayaa Xabsi Dhimis Mudadda uu Dhakhtarka ku jiro. Waxaana Shardi ah in Edabiisa & Shaqadiisuba ahayeen kuwo Fiican Lana socdo Shuruudaha ku Xusan Lambarka laad ee Qodobka 57aad ee Xeerka Mudadii ka horaysay Waalidiisa.

QODOBKA 70AAD
BILAWGA XABSI DHIMIDDA.

Habka Xabsi Dhimida awgii, sida ku dhigan Qodobka 57aad ee xeerka Taariikhda laga bilaabayaa Xisaabinta Xabsi Dhimidda waa Taariikhda Qabashada Maxbuuska. Maxbuuskii lagu siidaayo Balan qaad Sharf ee ka soo bixi waayay ama Jebiya Shuruudaha lagu Xidhay wuxuu galayaa Dembi amarka lagu Xukumana wuxuu mutaysanayaa Ciqaabta ku xusan Qodobka 55aad ee Xeerka.

QODOBKA 71AAD.
GUDIGGA SIIDAYNTA.

- 1- Waxaa Taliyuhu ka dhisayaa Xabsi kasta Gudi lagu Magacaabo Gudigga siidaynta taas oo ka kooban Taliyaha xabsiga oo Gudomiye ka ah & Xubin kale oo Taliyuhu Magacaabay.
- 2- Maxbuus kasta oo Xukun 6 Biloood markay ka hadhay siidayntiisa Gudigga siidaynta waa in uu arkaa oo uu u soo gudbiyaa Taliyaha Xogwaran buuxa oo ku Saabsan Maxbuuskaa kana kooban:-
- B)- Cadayn Shaqadiisa & Edabiisa ah oo lagu Ogaday Mudadii uu xabsiga Ku Jiray.
- T)- Himiladda uu ka leeyahay Noloshiisa dambe & Aayatiinka Noloshiisa Dambe.

QODOBKA 72.
SOO JEEDIN DIB U FIIRIN XUKUN.

- 1- Sida uu dhigaayo Qodobka 58aad ee Xeerku Taliyaha Maxabuus kata Oo xukumani Xadhigiisuna ka badan yahay 7 Sano. markii uu dhameeyo 4 Sano. Gaadhayna ama lagu wado in uu gaadhay Cimrigiisu 60 Sano.
- 2- Xogwarankaasi wa in uu ka koobnaadaa:-
- b)- Cadayn la Xidhiidha Shaqadiisa & Asluubtiisa.

1)- Cadayn Sarkaalka Caafimaadku uu soo Dhigay taas oo ka waramaysa Caafimaadka Maxbuuska & in Xabsi ku sii hayntiisa ama Xadhigiisu Ay wax yeelayaan Caafimaadka Maxbuuska & in kale

3)- Taliyaha xabsigu wuxuu u soo Dirayaa Xogwaran Taliyaha. Taliyuh-Na kedib marka uu helo Xog Warrnkaas waxa uu raacinayaa Aragtidiisa wuxuuna u dirayaa Madax-waynaha isaga oo marinaaya Wasiirka Cadaaladda JSL.

QAYBTA 11AAD
FAKASHO.

QODOBKA 73AAD.
KAHORTAGA FAKASHADDA.

Xubnaha Ciidanku waa in ay aad uga Foojignaadaan Fakashadda Maxaabiista Taasoo ku waajib ah inuu jaran-jarada Xadhkaha Sil-siladaha & wax allale wixii kale ee u Fududayn kara Fakashadda ee Xabsiga Gudihiiisa yaala Daryeelkeeda la hubiyaa lana adkeeyaa.

QODOBKA 74.
TALAABOYINKA LAGA QAADAAYO FAKASHO MARKA AY
DHACDO.

- 1)- Markay dhacdo Fakasho Maxbuus Taliyaha xabsigu waa inuu:-
- b)- Amraa Goobtii Fakashadu ka dhacday & Agagaarkeeda.
- t)- Waa in isla markaaba la diraa Koox ka tirsan Ciidanka oo Raacdo ah haday la noqotana hubiyaan.
- j)- Deg-deg ugu diraa Warbixin ku saabsan Fakashadaas Taliyaha Ciidanka Asluubta JSL. Taliyaha Qaybta Booliska. Xeer-Ilaaliyaha & Gudidda Degmadda isagoo si Tafa-tiran ugu sheegaya wax allaale wixii la xidhiidha Maxbuuska, Sida Magaciisa oo Sadexan. kan Hooyadii Dharkiisa, Da'adiisa, Midabkiisa & kan Indhaha . Timaha & wixii kale Ee uu Astaamo lahaa.
- x)- Furo baadhis Dacwo taas oo uu kaga Gungadhayo sababta keentay fakashadda. ku Meelaynaayana Xilkii Masuuliyadeed Fakashadda.
- Kh)- U dirtaa Taliyaha Wakhti munaasib ah. Xog waran Tafatiran kaas oo Uu kaga waramaayo Sababta & sida Fakashadu ku Dhacday kuna soo Lifaaqaayo Go'aankii Dacwadda Fakashadda.

QODOBKA 75.

HAYNTA MAXAABIISTA FAKATA QABASHADDA KADIB.

- 1- Maxbuuskii hayn hore oo Sharci ah ka Fakaday ama isku dayay inuu Fakado, soo gelitaankiisa dambe waa in loola dhaqmaa inuu yahay Qof ay ka suurawdo Xabsi Jabín & Fakashaba, hadii aanu la Dhaqankiisa ka dhaafin Taliyaha xabsigu isaga oo u Cuskanaaya Sabab Gaar ah Xubnaha Ciidanka ee loo Xilsaaray Hayntiisana waa in ay si gaara ah uga foajignaadaan.
- 2- Iyadoo la Tixgelinaayo Daryeelka Nabad-gelyadda Galka maxbuuska Fakadaa Qabashadiisa kadib, waxaa lagu Qorayaa Xarafka (F) oo loola jeedo Fakad.

QAYBTA 12AAD

LA DHAQANKA RACFAANLAYDDA GARSUGEYAASHA &

LAHAYAYAASHA.

QODOBKA 76.

- 1- Maxbuuska Racfanlayda ahi mudadda uu sugaayo Goanka Racfaanka. Waxaa lagu haynayaa Meel gaar ah Maxaabiista kale ee Xukuman hadiise aan xabsiga uu ku jiraa u Habaysnayn ama ay la noqoto Taliyaha Xabsiga in aanay Suuragal ahayn waxa uu ka mid noqonayaa Maxaabiista Xukuman.
- 2- Marka Maxbuuska Racfaanlayda ah uu Hor tago Maxkamada wuxuu Lehisanaaya Hugiisa Caadiga ah, hadiise aanu Hugiisa ahayn mid u Qalma Qofnimada, Taliyaha Xabsigu waxa uu siinayaa Hu ka duwan kan Maxaabiista.

QODOBKA 77. ISDHEX GALKA GARSUGEYAASHA &

LAHAYAYAASHA.

DHAWRAYA GO'AANKA XALAALAYNTA HAYNTOODA.

Maxaabiista Garsugeyaasha & Lahayayaasha Dhawraya Go'aanka Xalaalayntooda, isku meel ayaa la gu hayn karaa hadii aan Taliyuhu sabab kale awgeed amar ku bixin kala saaristooda maxaabiista noocaas ah Hayntooda ka gooni bay ahaanayaan kuwa Xukuman sida uu Dhigaayo Qodobka 23aad ee Xarafka hore ee Xeerkan.

QODOBKA 78.

MAXBUUS KU EEDAYSAN DIL.

- 1- Maxbuus ku eedaysan Dil hadii ay Suurtagal tahay Meel gaar aha ayaa lagu haynayaa, waxaana lagu haynayaa Feejignaan Buuxda, hase ahaatee Dhaqan kiisa kale sida, Cuntada, Gogosha, Dharka waxa uu la mid ahaanayaa Garsugeyaasha.
- 2- Maxbuus ku eedaysan Dil looma diri karo Shaqo.

QODOBKA 79.

XALAALAYNTA GARSUGEYAASHA AMA LA HAYAYAASHA.

Mararka qaarkod hadii loo baahdo Danta Guud ee Qaranka awgeed Maxbuus Garsuge ah ama Lahaye ah dhawrayana Go'aankii Xalaalaynta hayntiisa waa lagu Shaqaynayaa.

- 1- Marka ay shaqeeyaan Maxaabiista Noocaas ahi waxay yeelanayaan Wax allaale wixii abaalgud ah ee uu siiyo Xeerka & Xeer-nidaamiyaha Maxaabiista Xukuman.

QODOBKA 80 AAD.

HUGGA.

- 1- Markii Huga Maxabaaiista Garsugaha ah ama Lahayaha ahi aanu la Soconin Dhawritaanka Cafimaadka Xabsigga Sarkaalka Caafimaadku waxa uu awood u leeyahay isagoo Tixgelinaaya Daryeelida Caafimaadku inuu ku amro in la buufiyo ama la Dhaqo huga Maxaabiista, mudada Dhiqitaanka ama Buufinta waxa Maxbuuska la siinayaa Kumeelgaadh ahaan Huga Xabsiga.

QODOBKA 81.

GARSUGE YAASHA & LAHAYAYAASHA DHAWRAYA GO'AANKA XADHIGOODA.

- 1- Garsugeyaasha & Lahayaasha Dhawraaya Go'aanka Xalaalaynta Xadhigooda ee aanu Sarkaalka Caafimaadkuna ka reebin Shaqadda, waxay yeelanayaan Cuntada loogu talagalay Maxaabiista Shaqaynaysa oo b/ba.

QAYBTA 13AAD

MAXAABIISTA DILKA KU XULUMAN.

QODOBKA 82AAD.

TAKOORIDDA.

- 1- Maxbuus kasta oo Dil ku Xukuman waxaa lagu haynayaa Edega Daryeelka Buuxa waxaana Ilaalin joogto ah ku haynaya Ciidan ku filan Habeen & Maalinba.
- 2- Maxbuus kasta oo Dil ku Xukuman Fulitaankii Dilkiisuna soo Dhamaaday waxaa si Joogto ah u Ilaalinaya Xubno Ciidanka ka tirsan oo aan Tiradoodu ka yarayn Sadex Qof ugu yaraan midkood uu yahay Sarkaal Xigeen.
- 3- Taliyaha Xabsiga waxaa si gaar ah loo Xilsaarayaa inuu hubiyo Daryeelka Nabad-gelyadda Maxbuuska noocaas ah.

QODOBKA 83AAD
QORITAANKA & HELITAANKA WARAAQAHA.

- 1)- Qoritaanka& helitaanka Waraaqaha Maxabuuska Dilka ku Xukumani waxa ay ahaan doonaan sidan soo socota iyadoo mar kasta la tixgeliyaayo baahida Cadaadiska la Xidhiidha Daryeelka Nabad-gelyadda uu ku Taliyo Taliyaha Xabsigu.
- b)- Go'aanka Xukunka Dilka lagu Xukumay kadib wuxuu Maxbuusku u qorankaraa Sadex Warqadood Qoyskiisa, Saaxiibadiisa, & Qareenkiisa kadibna Warqad Todobaadkiiba.
- t)- In uu waraaqo ka helo Qoyskiisa, Saaxiibadiisa, Qareenkiisa, hadba sidii loogu soo Diro.
- 2- Wax alaalle wixii Waraaqo ah ee u socda ama kasocda maxbuus waxaa Baadhaya Taliyaha Xabsiga Lafahaantiisa ama Xubin sare oo uu u wakiishay Warqad kasta oo aan wax aan la Ogot'ayn ku Qoran yihiin waa la Joojinayaa.
- 3- Taliyaha Xabsigu wuxuu u Maamulayaa waraaqaha u socda ama ka socda Maxbuuska ku xukuman Dilka Buug gaar ah oo u habaysan sidan soo Socota:-
- b)- Magaca & Lambarka Maxbuuska
- t)- Magaca & Ciwaanka Qofka ay warqadu u socoto, ama Warqada laga helay.
- j)- Wixii Warqada laga helay oo la soo koobay.
- x)- Wax alaalle wixii aan la Ogot'ayn ee Warqadda ku Qoran.
- Kh)- Talaabadii warqadda laga Qaaday.

QODOBKA 84AAD
BOOQASHOYINKA MAXBUUSKA DILKA KU XUKUMAN.

Iyadoo la tixgeliyaayo Qodobka 38aad ee Xeerka & Ciqaabta 8aad ee Xeernidaamiyaha la Xidhiidha Booqashooyinka Maxaabiista iyadoo la raacaayo adkaynta uu ku Arimiyo Taliyaha Xabsigu Danta Daryeelka Nabad-gelyadda awgeed Booqashooyinka Maxbuuska Dilka ku Xukumani waxa ay ahaan doonaan sidan Hoos ku Xusan oo kaliya.

- b)- Sarkaalka Caafimaadka ee lagu Xusay Xarafka laad ee Qodobka 38aad ee Xeerka, taas oo ah sarkaalka Caafimaadka ee Xabsiga hadii loo baahdo wuxuu tashi la yeelan karaa Og'laanshaha Taliyaha Xabsiga kadib, Dhakhtarkii kale ee uu uga baahdo daryeelka Caafimaadka Mabuuska.
- t)- Hay'addaha Cadaaladda ka tirsan awoodna u leh Booqashadda Maxa-

uuska Dilka ku Xukuman iyadoo Hawshooda Gudanaaya waa in ay soo waydiistaan Taliyaha Xabsigga Booqashada noocaas ah. lamana ogolaan karo, kadib markii Go'aankii Dilka la ogolaado ee Dhawraya fulitaanka Xukunkaasi.

- j)- Taliyaha xabsigu wuxuu u Ogot'aan karaa Maxbuuskii ku Xukuma Dilka Booqasho Qareen oo ku Xidhan Shuruudahan soo socda:-
- 1- Booqasho la Xidhiidha Daawadda
 - 2- Qareen ka soo warsaday Booqashada ugu yaraan 2 Sacadood ka hor
 - 3- Booqashadu waa in ay ahaataa saacadaha Xabsigu Shaqaynayo.
- x)- Cadaymo Qoraal ah oo uu Maxbuusku sameeyay ama Xusuusaha (Notes) oo uu qaatay Qareenku wuxuu tusayaa Taliyaha xabsiga si uu ugu qanco in ay yihiin kuwo la Xidhiidha Daawadda maxbuuska oo aan si kale loogu talo galin. haday tahay Wargaysyadda ama Dad kale taliyaha Xabsigu uma Ogl'aan karo Qareenka la bixitaanka Cadaymaha & Xusuusaha hadii aanu ku qancin ula Jeedadda.
- kh)- Taliyaha xabsigu wuxuu u Ogl'aan karaa Maxbuuska Dilka ku Xukuman in ay soo Booqdaan Xaaskiisa & Caruurtiisa Qaangaadhka ahi Iyo Waalidkiis hadii ay la socdaan. waxaanay Booqashooyinkaasi ku Xidhan yihiin Shuruudaha soo socda:-
- d)- Maxbuusk ku Xukuman Dil lama soo Booqan karo Todobaadka ugu horeeya Xadhigiisa & Todobaadka ugu Dambeeya Fulitaanka Dilka

QODOBKA 85AAD JIMICSIGA.

Maxbuus kasta oo Dil ku Xukuman waxaa Xerada uu ku yaaly Udega lagu hayo uu ku qaadanayaa Jimicsi Hal Saac ah. maalin kasta hadii sidaa wax ka hor yimaadaa aanay jirin. wuxuuna Qaadanayaa Jimicsigaa isaga oo ay ilaalinayaan Ciidan ka kooban ugu yaraan Sadex Xubnood oo midkood yahay sarkaal Xigeen.

QODOBKA 86AAD. KUTUB.

Maxbuuskii ku Xukuman Dil waxaa loo Ogola'anayaa Kutub diini ah kuwo Idiyoolajiyeed & kuwo Suugaan ah. hadii uu Warsado taliyaha Xabsigga.

QODOBKA 87AAD CUNO GAAR AH HABEENKA KA HORAYSA FULITAANKA DILKA.

Taliyaha Xabsigu wuxuu awood u leeyahay in uu siiyo Maxbuuskaas dilka ku Xukuman Cuno gaar ah oo uu Doortay Habeenka ka horaysa Fulitaanka Dilka.

QODOBKA 88AAD.
DARDAARAN.

Fulitaanka Dilka ka hor wuxuu Taliyaha Xabsigu waydiinayaa Maxbuuska in uu doonaayo in uu Dardaarmo. hadii uu Maxbuusku doono in uu Dar-daarmo waxa laga qorayaa Dar-daarankaasi isga oo uu goobjoog ka yahay garsoore Maxkamadeed & Qareenkiisu, waxaana loo gudbinayaa Qofka uu khuseeyo hadii uu jiro Dar-darankaas waxa aan Sharcigu Ogola'ayn Taliyaha xabsiggu wuxuu awood u leeyahay in uu ka reebo.

QAYBTA 14AAD.

QUBANE.

QODOBKA 89AAD.

WAAJIBAADKA XUBNAHA KA SAARAN XABSIYADDA.

- 1- Waxaa ku waajib ah Xubnaha Ciidanka ah oo dhan in ay Gutaan Shaqadooda & Masuuliyadooda la Xidhiidha sida uu dhigaayo Xeerka aasaaska Ciidanka Asluubta JSL & Xeer Lambar 7. soona baxay 31/12/71dii & Xeer-nidaamiyaha ama amarada Joogtada ah Tusaalooyinka rasmiga ah amarada Guud ama gaar ee uu soo saaro Taliyuhu kuna Saabsan Maamulka haboon ee Xabsiyada JSL.
- 2- Jebitaanka ku Xadgudubka ka yimaada Xubin Ciidanka ka Tirsan ee Ee la Xidhiidha Xeerka Xeer-nidaamiyuhu amaradda Joogtada ah ama Tusaalooyinka rasmiga ah wuxuu ahaanayaa Qof galay dambi wuxuuna mutaysanayaa sida uu Dhigaayo Sharcigu.

QODOBKA 90 AAD.

WAAJIBAADKA ILAALINTA MAXAABIISTA.

- 1- Markii loo wadaayo maxaabiista Xabsi Dibadiisa hadii ay tahay Shaqo Ama siyaabo kale. Taliyaha Xabsiggu ama Xubinta kale ee uu wakiishay waxaa ku waajib ah inuu qaado Talabo kasta oo looga baahan yahay Daryeelka Nabad-gelyadda.
- 2- Tirada maxaabiista & Ciidanka Ilaalinaaya maxaabiista isu dheeli-Tirkooda & Qalabkooda lagu Isticmaali karo Goob kasta ama wakhti kasta waxaa lagu cadaynayaa Amaradda Joogtada ah. hase ahaatee meeshii uu Joogo Ciidan ku Filan. Xubin looma dhiibi karo Shan Maxbuus hadii ay meesha Shaqadu tahay Godoon kana baxsantahay Xabsiga marka ay Maxaabiistu ku Shaqaynayso Koox Wadajir ah. tiradda Maxaabiista Xubintaa kaxayn karta waxaa go'aankeeda Goyn kara Taliyaha Xabsiga.

QODOBKA 91AAD.
ABUURISTA SANDUUQ ABAAL GUD & GANAAX.

- 1- Taliyaha Xabsigu wuxuu abuurayaa Sanduuq lagu Magacaabo Abaal-Gudka & Ganaaxa
- 2- Sanduuqa waxa lagu ridayaa wax alaalle wixii Lacag Ganaax ah & Wax allaale wixii ka soo baxa Allaabo Madnuuc ah oo la Gaday Xabsi kasta halaga qabtee Ganaaxa & Allaabta madnuuc ah ee la qabtay oo loo cuskaday Xeerka & Xeer-nidaamiyaha ama Amaradda Joogtada ah.
- 3- Sanduuqa Abaalgudka & Ganaaxa waxaa lagu haynayaa Taliska Ciidanka Asluubta Iyadoo lagu muujinaayo wax alaalle wixii Lacag ah ee ku soo dhacday meesha ay ka yimaadeen. Taariikhda Lacagta la qabtay, wixii Lacag ah ee la bixiyay Taliyuhuna Sadexdii Biloodba mar buu u dirayaa Nuqul Xisaabta Lacagataas ah Xabsiyada oo dhan.
- 4- Taliyuhu wuxuu awood u leeyaya in uu Ogola'ado in Sanduuqa looga dhiibo siyaalahan soo socda:-
 - b- In laga kaalmeeyo Xaaska & Caruurta Maxbuuska Dhintay.
 - 1)- In Abaalgud laga bixiyo la Xidhiidha Tartamo Ciyaareed oo dhexmara Maxaabiista.
 - j)- In Abaalgud laga siiyo Maxabuuskii ku mutaysta Hawl Qaran oo uu qabtay.
 - x)- In laga kaalmeeyo Horumarinta Waxbarashada, Ciyaaraha Madadaaladda Samafalka.
 - Kh)- Iyo waxa alaalle wixii kale ee ay la noqoto Taliyaha in uu ku kaalm-Eeyo.
- 5- Taliyaha oo kaliya ayaa Amri kara in Sanduuqa Lacag laga bixiyo
- 6- Xabsi kasta Taliyaha ka Masuulka ahi waxa uu Qoral u soo Gudbinayaa Taliyaha Maxaabiista u Qalanta Abaalgud & meelihii uu rabo in sanduuqa lagu kaalmeeyo.

QAYBTA 15AAD

GABA-GABAYN.

QODOBKA 92AAD.

TIR-TIRID.

Xeer-nidaamiyihii Xabsiyadii JDS Lambarkiisuna ahaa 453 waa la Tir-tiray, Xeer-nidaamiyahanina waxa uu Dhaqan galayaa Taariikhda uu Saxeexo Madax-waynaha JSL.